

Coronavirus 2019 (COVID-19)

Ogaysiis Muhiim ah oo ku Socda Waalidiinta iyo Shaqaalaha

Maamulayaasha Dugsiyada Dadweynaha ee Jefferson County (JCPS) waxay xiriir joogto ah la lahaayeen Waaxda Caafimaadka iyo Fayaqabka Bulshada ee Louisville Metro (LMDPHW) kuna saabsan Cudurka Coronavirus 2019 (COVID-19) si loo hubiyo inaan qaadno dhammaan tallaabooyinka taxaddarka si looga hortago faafitaanka fayraska.

Si aad u hesho macluumaadkii ugu dambeeyay ee Xarumaha Xakamaynta Cudurada COVID-19, booqo bartan:

<https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/index.html>

Waxa Aad u Baahan Tahay inaad Ogaato

COVID-19 waa nooc fayras kaas oo sababa cudurada dar darrooyinka kala duwan, laga bilaabo hargabka caadiga ah iyo cudurada neefsashada ee aadka u daran.

Sidee loo faafiyaa?

- Qufaca iyo hindhisada
- Xiriir dhow oo shaqsiyeed, sida taabashada ama gacan salaanta
- Taabashada shay ama dusha sare ee fayrasku saaran yahay kadibna taabashada afkaaga, sankaa, ama indhahaaga kahor intaadan gacmahaaga dhaqin

Waa maxay astaamuhu?

- Qandho
- Qufac
- Neefsashadoo adkaato
- Jirro daran

Maxaan samayn karaa?

- U dhaq gacmahaaga si joogto ah.
- Ka caawi ardayda da'da yar inay gacmahooda si wanaagsan u dhaqaan.
- Guriga joog marka aad xanuun dareento, oo la tasho xirfadle caafimaad.
- Dabool sankaa iyo afkaaga markaad qufacayso ama hindhiseyso.
- Ka fogow xiriir dhow inaad la yeelatid qof kasta oo leh astaamaha hargabka-ama ifilada u eg.
- Haddii aad xiriir dhow la yeelatid qof muujinaya astaamaha COVID-19 kaasoo dhowaan safray, fadlan la xiriir xirfadle caafimaad si aad u go'aamiso haddii aad u baahan tahay in lagaa baaro.

JCPS horeyba waxay u leedahay Qorshaha Dhacdada Faafa ee (PVEP) kaasoo tafaasiil ka bixinaya dhowr tilaabo oo ay degmadu qaadayso si loo ilaaliyo ardayda iyo shaqaalaha. Waxaan rabnaa inaan kugu wargalinno talaabooyinkayaga oo aan ka jawaabno su'aal kasta oo aad qabtid. Dhowr ka mid ah waxyaabaha ficil ee ka socda PVEP ayaa lagu faahfaahiyay faylka ku lifaaqan.

Waxaa muhiim ah in la ogaado in degmadu sii wadi doonto la shaqeynta maamulka maxalliga ah, gobolka, iyo federaalka. Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad iska diiwaangeliso farriimaha muhiimka ah ee ka socda JCPS illaa Dugsiga Messenger. Waad dooran kartaa adiga oo xarafka "Y" u diraya 67587.

Haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan COVID-19, waxaad kala xariiri kartaa Xarumaha Xakamaynta iyo Ka Hortagga Cudurrada (CDC) 1-800-232-4636.